



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka [Benefits.Ohio.Gov](https://www.Benefits.Ohio.Gov),
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga [JFS.Ohio.Gov/County](https://www.JFS.Ohio.Gov/County).

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga [Medicaid.Ohio.Gov](https://www.Medicaid.Ohio.Gov).

**Ohio**

Department of  
Medicaid

## Waaxdka Adeegyada Dhaafista Naafooyinka Koboceed

Qaar ka mid ah dhaafista Medicaid waxay dadka naafonimada iyo xaaladaha caafimaad ee raaga qaba u oggolaadaan inay daryeelka ku helaan guryahooda iyo bulshooyinka halkii ay ku heli lahaayeen xarumaha daryeelka muddada dheer, cusbitaalada ama xarumaha daryeelka ee heer dhexe. Adeegyadaan waxay sidoo kale u sahlayaan dadka inay maamul xoogan kuyeestaan daryeelkooda ayna bulshadooda saamayn kudhex lahaadaan.

Saddex caawimaadood ayaa laga heli karaa Waaxda Ohio u qaabilsan Naafanimada Koboca si gacan loo siiyo loogana caawiyo inay shaqsiyaadkula qabsadaan nolosha bulshada.

- Caawimaadda Self-Empowered Life Funding (SELF) Waiver ayaa shaqsiyaadka u oggolaanaysa inay hagaan sida iyo meesha ay adeegyada ka helaan.
- Caawimaadda Level One Waiver ayaa bixisa taageerada ugu yar ee la bixiyo si ay ugu kordhiso caawimaadda caadiga ah ee ka timaadda qoyska, iskuulka ama goobta shaqada ee shaqsiyaadkuku haystaan bulshadooda.
- Caawimaadda Individual Options Waiver waa caawimaad ka sii ballaaran taasoo u sahlaya dadka leh baahiyo cayiman inay ku noolaadaan bulshada ay doortaan oo ay taageero ka helayaan halkii ay xarun daryeel joogi lahaayeen.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan SELF, Level One iyo Individual Options Waivers, fadlan la xariir guddiga degmadaada u qaabilsan naafooyinka koboca (developmental disabilities).

Macluumaadka xiriirka waxa laga heli karaa halkan [DODD.Ohio.Gov/CountyBoards](https://www.DODD.Ohio.Gov/CountyBoards)